

Ku soo dhowaada Maktabada!

Maktabadaha Gästrikland iyo Hälsingland waay wada shaqeeyaan. Waxaa loogu yeeraa maktabadaha HelGe.

Kaarka amaahda iyo waqtiga amaahda

Si aad u amaahsatid waxyaabaha maktabada yaala waxaad u baahantahay kaar iyo lambar sir ah. Waxaad dhamaan maktabadaha HelGe ka isticmaali kartaa kaarkaaga amaahda. Waxaad kaarkaaga ku amaahan kartaa buugag, buugagta leh cod, filimada, jaraa'id, koorsooyin luqadaha, buugaagta leh codka iyo waxyaabo kale. Ka amaaho, dib u celi amaahda ama dalbo/saf u gal maktabad kaste oo ka tirsan HelGe mar kastoo aad doontid.

Mudada amaahda waxaa saldhig u ah sheeyga aad amaahsaneysid. Bugaagta badanaaba waxaad amaahsan kartaa muddo dhan afar isbuuc. Waxaad heli kartaa in lagu soo diro sms ama fariin ii meylka ah dhowr maalmo ka hore intuusan waqtiga amaahda aan la gaarin. Keeydso rasiidka mar waliba!

Kaarka amaahda waa warqad qiimo leh. Adiga ayaa masuul ka ah wax waliba ood ku amaahsato.

Haddii uu kaa lumo kaarka waa inaad la xiriirta maktabada si uusan ruux kale u isticmaalin.

Caruurta da'adoodu ka sareeyso 6 jir waxaay sameeyan karaan kaar u gaar ah. Waalidka ama qofkii ka masuulka ah ayaa masuuliyada kaarka iska leh ilaa aay caruurta ka gaarto 18 jir.

Sida badan waxyaabaha la amaahsado waa bilaash laakin waxaa jira waxaan bilaash ahayn

Waa bilaash waxyaabaha aad ka amaahsato maktabadaha HelGe. Laakin haddii aad la soo daahdid celinta amaahda waxaad bixineysaa 1 karuunar maalin kaste. Qaar ka mid ah maktabadaha waxaa laga amaahsan karaa ciyaaraha TV-ga. Haddii aad la daahdid ciyaaraha TV-ga waxaad bixineysaa 10 karuunar maalin kaste oo la daahdid. Haddii lacagta laguugu leeyahay aay gaarto 100 karuunar ama ka badan waa la xayirayaa kaarkaaga. Ma amaahsan kartid wax kale inta deynta laguugu leeyahay ka yaraato 100 karuunar.

Haddii aay amaahdu jabto ama lunto

Lacagta hoos ku qoran ayaad bixineysaa haddii aay amaahdu halaawdo ama dhunto. Oggow lacagta hoos ku qoran baaxadeeda waxbaa iska bedeli karo haddii qiimaha amaahdu uu ka badan yahay.

Buugaagta dadka waaweyn ama buugaagta codka leh	300 kr
Buugaagta caruurta ama buugaagta caruurta codka leh	200 kr
CD-muusikada	200 kr
CD-caruurta	150 kr
Jaraa'id	50 kr
Filimada iyo ciyaarta TVga	500 kr
Luqadaha iyo CD-rom	500 kr
Buugaagta loo yaqaano Daisy	150 kr
Kaarka amaahda	20 kr

Bartaan ayaad ka raadsan kartaa buugaag iwm iyo akhbaar dheeraad ah www.helgebiblioteken.se

